

# Waa maxay muhiimadda ay leedahay in la fahmo saamaynta xagjirnimada?

Pelastakaa Lapset
Save the Children

Euroopan unionin osarahoittama

# CARUURTU WAXAY U NUGLAADAAN MACLUUMAAD RABSHADO IYO XAGJIRNIMO LEH OO INTERNETKA KU JIRA

Xagjirnimada ku dhacda caruurta iyo dhallinyarada, iyo sidoo kale in ay u nuglaadaan saamaynta fikradaha xagjirka ah ee lagu faafiyo internetka, ayaa noqotay arrin walaac weyn leh oo ka jirta Finland gudaheeda iyo caalamkaba. Baraha bulshada iyo degaanka ciyaaraha (peliympäristö) oo ah qalabka lagu ciyaaro ee shaashadaha lagu xiro, ayaa fududeeyay in si dhibyar oo sahlan lagu helo fikradaha xagjirka ah iyo kooxaha wada fikradahaasiba. Hadalka nacaybka kicinaaya iyo muuqaallada wata xoogmuquuninta ama gacan kahadalka (väkivalta) ayaa noqday wax si caadi ah looga arko meelo badan oo internetka ah xilliyada ay socdaan hawlaha la xiriira nololmaalmeedka caadiga ah — nasiib darro, waxay noqdeen qaybo ka mid ah nolosha dhijitaalka ah ee carruur iyo dhalinyaro badan.

Dhallinyaradu waxaa ay si gaar ah u yihiin bartilmaalmeed ay jecel yihiin kooxaha xagjirka ah, sababtoo ah marxaladda dhallinyarannimada waa marxaladda korriinka iyo horumarka, taasoo ah marxalad uu abuurmaayo ama samaysmaayo sawirka uu ka haysto dunida iyo qaab fekirkiisaba. Da'da dhallinyarannimada inta badan fikirku waa mid madoow iyo caddaan ah, iyadoo awoodda lagu fahmi karo sababaha iyo natiijada xiriirrada adag ay tahay weli mid ku jirta xilligii koboca ama horumarka. Sidaas darteed, xogta iyo farriimaha xagjirnimada ah ayaa dhallinyarada ugu muuqan kara kuwo si gaar ah soo jiidasho u leh, maadaama ay xogahaasi yihiin kuwo bixinaaya jawaabo fudud oo cad oo ku saabsan su'aalo adag oo nolosha la xiriira. Mid ka mid ah hawlaha ugu muhiimsan ee marxaladda dhallinyarannimada waa in qofku dhiso aqoonsigiisa (identiteetti) iyo in uu ka madaxbannaanaado waalidkiisa, isla wakhtigaas dhallinyaradu waxay weli baranayaan xirfado nololeed oo muhiim ah, sida qaabka loo maareeyo dareenka iyo sida qofku uu naftiisa u xakamayn lahaa, sababahaas awgood, dhallinyaradu waxaa ay si gaar ah ugu nugul yihiin in ay qaataan ama ay saamayn ku yeeshaan waxyaabaha dibadda uga imanaaya.

Waalid ahaan waa muhiim in la fahmo in caruurta iyo dhallinyarada ay aad ugu badan tahay, in ay internetka kala kulmaan xogo iyo macluumad ka kooban xoogmuquunin ama gacan ka hadal iyo nacayb, kuwaas oo loogu talaggalay in lagu saameeyo fikirradooda iyo aragtidooda la xiriirta dunida. Waxaa wanaagsan in caruurta iyo dhallinyarada mar horeba lala yeesho wadahadal ku saabsan khataraha suurtagalka ah ee ka iman kara dhankaas, islamarkaana la hubiyo in ay leeyihiin aqoonta iyo xirfadaha lagama maarmaanka u ah sidii qaab ammaan leh loogu isticmaali lahaa internetka. Arrinka ugu muhiimsan waa in la muujiyo xiise dhab ah oo ku saabsan nolosha dhijitaalka ah ee dhallinyarada, iyo in la garab istaago marka ay la kulmaan xaalado adag ama jahawareer leh.

U nuglaanshaha xogaha xambaarsan xoogmuquuninta ama gacan ka hadalka (väkivalta) iyo nacaybka waxay saamayn xun ku yeeshaan caafimaadka maskaxda ee caruurta, islamarkaana waxay ku keenaan caruurta welwel, cabsi iyo jahawareer. Sidoo kale xogahani waxay wiiqaan kalsoonida lagu qabo bulsho dimuqraadi ah, waxay caadi ka dhigaan afkaarta xambaarsan xoogmuquuninta iyo takoorista, sidoo kale waxay kordhiyaan kala qaybsanaanta iyo iskahorimaadka bulshada dhexdeeda ah, waxayna sii adkeeyaan in arrimaha loo arko si wanaagsan oo dhexdhexaadnimo iyo caddaalad ku salaysan.

## KU BIIRISTA XAGJIRNIMADA WADATA XOOGMUQUUNIN AMA GACAN KA HADAL (VÄKIVALTANEN RADIKALISOITUMINEN)

Xagjirnimada wadata xoogmuquuninta ama gacan kahadalka waa hab uu qofku ku maro isbeddello isaga ku dhacaaya, kuwaasoo keenaaya in ay sii adkaadaan aragtiyada dhanka qiyamka (arvo) iyo fahamka uu qofkaasi dunida ka haysto, islamarkaana waxaa uu qofku bilaabayaa in uu yeesho astaamo ku salaysan xagjirnimo. Inta ay socdaan afkaarahan xagjirnimada ee ku salaysan xoogmuquuninta, waxaa uu arrinkaas sii horseedaa in fikirka qofku uu noqdo mid ku dhisan xagjirnimo.

## XAGJIRNIMADA XOOGMUQUUNINTA AMA GACAN KAHADALKA AH (VÄKIVALTANEN EKSTREMISMI)

Xagjirnimada xoogmuquuninta ama gacan kahadalka ah waxaa loola jeedaa taageeridda, ku dhiirrigelinta, ku hanjabidda iyo isticmaalka xoogmuquuninta ama gacan kahadalka ku salaysan afkaar ama aydoloojiyad gaar ah oo uu qofku arrimaha dunida ka qabo. Fikradaha ama aydoloojiyooyinka xagjirka ah badanaa waxaa ka dhexeeya arrinka ah, in ay diidaan ama ka soo horjeedsadaan kala duwanaanshaha dadka, xuquuqda aadanaha ee ku dhisan sinnaanta iyo caddaaladda, iyo sidoo kale in ay diidaan dimuqraadiyadda iyo nidaamka ku dhisan sharciyadda iyo dowladnimada.

## SAAMAYNTA XAGJIRNIMADA DHANKA INTERNETKA

Saamaynta xagjirnimada dhanka internetka waa hawl lagu isticmaalo baraha internetka, si loo faafiyo loona caadiyeeyo fikradaha ku salaysan xoogmuquuninta ama gacan ka hadalka, islamarkaana lagu soo jiito dad cusub si ay ugu biiraan dhaqdhaqaaqyadaas. Saamayntaan waxaa lagu beegsadaa kooxo ballaaran oo dad ah, iyo sidoo kale dad gaar ah oo si ula kac ah loo xusho.

## XOG NOOCEE AMA QAABKEE AH AYAY DHALLINYARADU LA KULMAAN?

Xogaha xambaarsan xagjirnimada waxaa ay leeyihiin astaamo u gaar ah oo lagu garto, kuwaasoo ay ka mid yihiin, u qurxinta ama sharciyaynta falalka xoogmuquuninta ah, yasidda ama quursiga qiimaha bini'aadantinimadaee kooxo gaar ah, hoos u dhigidda iyo in si ula kac ah looga dhigo kuwo aan bini'aadminnimo lahayn. Sidoo kale, arrimahaasi waa kuwo lagu doonaayo in lagu wiiqo kalsoonida lagu qabo dimuqraadiyadda. Gaar ahaan dhallinyarada waxaa ay inta badan u nuglaadaan xogo ama macluumaad ku salaysan takooris iyo cunsuriyad, kuwaasoo ka dhan ah ama looga soo horjeedo dadka laga tirada badan yahay, iyo sidoo kale hadallo kicin ah oo xambaarsan nacayb. Sidoo kale waxaa aad u badan qaybinta xogaha ku saabsan falalka ku salaysan xoogmuquuninta ama gacan ka hadalka.

Xogaha xambaarsan xagjirnimada waxaa lagu faafiyaa baraha bulshada iyo ciyaaraha ay caruurta iyo dhallinyaradu aadka u isticmaalaan, sida TikTok, Instagram, Telegram, Roblox, Minecraft, Discord, iyo Snapchat-ka, barahaas oo ah kuwo ay dhallinyaradu si fiican u yaqaannaan, islamarkaana loo adeegsado saamaynta xagjirnimada ee internetka.

Inta badan dhallinyaradu uma baahna in ay si firfircoon u raadiyaan waxyaabahan ku salaysan xagjirnimada ama nacaybka, balse waxaa ay si fudud uga helayaan baraha bulshada, tusaale ahaan iyadoo loo soo maraayo dhanka talooyinka tooska ah ee uga imaanaaya ablikeeshinnada ciyaaraha iyo kuwa baraha bulshada, iyo waxyaabaha ay saaxibbadu la wadaagayaan iyaga.

Mararka qaarkood xogaha ku saabsan xagjirnimada waa ay adag tahay in la garto, sababtoo ah waxaa lagu qariyaa farriin xambaarsan kaftan ama luqad qarsoon oo qaab koodh ama nidaam astaamo adeegsi ah la isticmaalaayo (koodikieli). Inta badan ujeeddada arrinkaas laga leeyahay waa in qofka saamayn lagu yeesho xitaa isagoo aan si toos ah uga warqabin arrinkaas, markaasoo fariinta xagjirka ah si ula kac ah loo qarinaayo ama loo yaraynaayo.

## Hababka loo adeegsado saamaynta xagjirnimada ee dhanka internetka:

- **Isticmaalka luqad qarsoon oo loo isticmaalaayo qaab koodh ama nidaam astaamo adeegsi ah (koodikieli), kuwo leh laba macno ama tilmaamo iyo tixraacyo gaar ah** – Ujeeddadu waa in la abuuro "kooxo gudaha ah oo sir leh, iyo in la kordhiyo dareenka wadajirnimada, islamarkaana la abuuro sawir cadawtinimo ah.
- **Isticmaalka kaftanka iyo dhaqan casriyeedka caanka ah (populaarikulttuuri)** – Waxyaabaha madaddaalada leh waxay si gaar ah u soo jiitaan dhallinyarada, waxayna qariyaan farriimaha nacaybka leh, islamarkaana waxay kordhiyaan in qofku si fudud ula qabsado ama ula falgalo waxa la soo bandhigaayo.
- **Farriimo dareenka kicinaaya** – Waxyaabaha la soo bandhigaayo waa kuwo si gaar ah looga faa'iidaysanaayo dareennada caddaaladdarrada iyo ciilka leh, waxaana la isku dayaa in loo leexiyo dhanka aragtiyo xambaarsan nacayb.
- **Faafinta warar been ah iyo aragtiyo shirqool leh** – Waxaa la faafiyaa macluumaad khaldan oo been abuur ah, si loogu sharciyeeyo fikradaha xagjirnimada ku salaysan.
- **Isticmaalka waxyaabo ku dhexjira ciyaaraha** – Ciyaaraha dhijitaalka ah ee caanka ah ayaa mararka qaar loo beddelaa qaabab lagu horumarinaayo fikradaha ku salaysan nacaybka iyo xagjirnimada.
- **Waxa loo yaqaan guruumin-ka (Grooming) oo ah galmo ku qalqaalinta da'yarta ama carruurta ee internetka ka bilaabata** – Qofka falka samaynaaya wuxuu isku dayayaa in uu dhiso xiriir kalsooni leh oo uu la yeesho ilmaha ama qofka dhallinyarada ah, si uu hadhoow saamayn ugu yeesho, islamarkaana uu ugu jiheeyo falalka ku salaysan xagjirnimada.

# SIDEE LAGU GARTAA IN QOFKA DHALLINYARADA AH UU QAATAY FIKRADAHA KU SALAYSAN XOOGMUQUUNINTA, AMA UU U NUGLAADAY OO AY SAAMAYSAY XAGJIRNIMO?

**La soco hadalka qofka dhallllinyarada ah. Hadalku wuxuu muujiyaa fikirka iyo aragtiyaha ku jira ee uu qofku aaminsan yahay.**

Haddii aad ku aragto hadalka qofka dhallinyarada ah calaamado soo noqnoqda oo muujinaaya aragtiyo waxyeello leh ama takoor ah, waa muhiim in si degdeg ah arrimahaas wax looga qabto. Calaamadahaas waxaa ka mid noqon kara, tusaale ahaan:

- Su'aal gelinta kala duwanaanshaha iyo sinnaanta iyo caddaaladda, sida yasidda ama hoos u dhigidda gabdhaha iyo haweenka, ama aflagaadaynta dadka ka tirsan kooxda laga tirada badan yahay ee hawaysta jinsiga la midka ah (seksuaali- ja sukupuolivähemmistö).
- Yasitaan ama hadallo takoor ama cunsuriyadda ah oo kaftan lagu dhex qariyo, sida kaftanno ama hadallo hoos u dhigaaya ama lagu yasaayo kooxo gaar ah oo dadka ka mid ah.
- Fikir xooggan oo ku saabsan "annaga iyo iyaga", halka iyaga loo arko kuwo khaldan, la yaso ama laga dhigo kuwo aan bini'aadamba ahayn (tusaale ahaan in lala barbar dhigo xayawaan ama wax kale oo aan la aqoon).
- In uu qofka dhallinyarada ah isu arko in uu yahay dhibbane, in si xun loola dhaqma amala takooray, taasoo ay sameeyeen kooxo kale oo dadka ah.
- In qofku u arko naftiisa ama kooxdiisa in ay ka sarreeyaan kuwa kale. Taasoo ah in aragtidiisa, fikiraddiisa iyo sifooyinkiisa uu u arko kuwo ka fiican ama ka sarreeya aragtiyada dadka kale.

U nuglaanta ama saamaynta xagjirnimadu waxaa ay qofka dhallinyarada ah ku dhalisaa welwel iyo cabsi. Xaaladaha qaarkood waxaa dhici karta in qofka dhallinyarada ah uu dadka ka dhexbaxo oo uu galo xaalad go'doon ah. Haddii qofka dhallinyarada ah uu u muuqdo mid aan doonayn in uu ka hadlo waxyaabaha uu internetka kala kulmay, ama haddii arrimaha nolosha ee ku xeeran qofka dhallinyarada ah ay si weyn u yaraato, sida xiisaha uu arrinkaas u hayo ama xiriirka uu la leeyahay bulshada inteeda kale, waa muhiim in lala sameeyo wadahadal furan, si loo fahmo waxa dhab ahaantii socda ama xaaladda taagan waxa ay tahay.

# SIDEEBAA LOOGA ILAALIYAA DHALLINYARADA SAAMAYNTA XAGJIRNIMADA

## 1. Ka caawi dhallinyarada in ay la tacaalaan ama wax ka qabtaan dareennada adag, kuna dhiirrigeli in ay isdhexgal wanaagsan la yeeshaan dadka kala duwan.

- Ka taageer dhalinyarada dhisidda xiriirro macno leh oo ay dadka la yeeshaan. Waa muhiim in la hubiyo in qofka dhallinyarada ah uu helo bulsho ammaan ah oo muhiim u ah, maadaama saamaynta xagjirnimada ah ay tahay mid si gaar ah looga faa'iidaysanaayo baahida bani'aadamka ee ah, in uu qofku ka mid noqdo koox, si uu dareemo qiimo iyo muhiimad.
- Ku dhiirrigeli dhallinyarada in ay la shaqeeyaan dad kala duwan, kuna xooji naxariista ama dareen wadaagga (empatia). Xirfadaha dareen wadaagga ee wanaagsan waxaa ay suurtaggeliyaan in la dhiso xiriirro macno leh, waxaa ayna kordhiyaan awoodda uu qofku u leeyahay in uu fahmo sida uu qofka kale u dareemaayo.
- Ka caawi dhallinyarada in ay la tacaalaan waayo-aragnimada adag iyo xaaladaha aan caddaaladda ahayn, sababtoo ah dareenka caddaalad darrada ayaa badanaa noqda waxa sii xoojiya fikradaha xagjirka ah.
- Kala hadal qofka dhallinyarada ah arrinka ah, in uu dareemaayo kelinnimo ama in uu bulshada ka dhex baxsan yahay, si looga hortago in dareenkaasu uu uusan isu beddelin mid ku salaysan caro ama nacayb loo qaado dadka kale.
- Tababar kula qaado qofka dhallinyarada ah ama isla sameeya xirfadaha dareenka (tunnetaito), sida aqoonsiga dareenka, muujintiisa iyo maarayntiisaba. Gaar ahaan, hubanti la'aanta ama rajo la'aanta dhanka arrimaha mustaqbalka waxaa ay keeni karaan cabsi iyo welwel - dareennadan ayaana si ula kac ah loogu isticmaalaa si dadka loo saameeyo looguna jiheeyo dhanka xagjirnimada.

## 2. Muuji xiisaha ku aaddan nolosha dhijitaalka ah ee dhallinyarada

- Xusuusnoow in deegaanka dhijitaalka ah uu yahay dhallinyarada qalab muhiim u ah xiriirka internetka iyo baraha bulshada, waana meelaha ugu muhiimsan ee ay dhallinyaradu ku wada xiriiraan, ku dhisaan aqoonsigooda, wax ku bartaan, ku nastaan, islamarkaana ay ku ilaashadaan xiriirrada saaxiibtinnimo.
- Ha ka biqin in aad su'aalo waydiiso - looma baahna in aad wax walba ogaato. Si kalsooni leh u waydii qofka dhallinyarada ah arrimaha ka socda baraha bulshada iyo meelaha uu wakhtiga ku qaato, iyo waxa uu halkaas kala kulmo.
- Si dhab ah u dhegeyso – ha iska indhatirin waayo-aragnimada qofka dhallinyarada ah. Waxyaabaha ka dhacaaya internetka waxaa ay u saameeyaan caafimaadka iyo nolol wanaagga qofka dhallinyarada ah, si la mid ah sida ay u saameeyaan waxyaabaha ka dhaca nolosha caadiga ah ee internetka ka baxsan. Wadahadal furan iyo xiise dhab ah ayaa abuura kalsooni, waxaana uu arrinkaasi ka caawinayaa dhallinyarada, in ay fahmaan oo wax ka qabtaan wixii ay kala kulmeen internetka.
- Ha eedeynin ama ha ciqaabin haddii uu qofka dhallinyarada ah kuu sheego in uu internetka kala kulmay waxyaabo dhibaato ah ama khaldan, iska ilaali inaad eedeyso. Sidoo kale xusuuso in aad isdejiso, si aad u abuurto jawi ammaan ah oo keeni kara in qofka dhallinyarada ah uu kugu kalsoonaado.

## 3. Xooji ammaanka iyo badbaadada dhallinyarada ee deegaanka dhijitaalka

- Kala hadal oo la falanqee qofka dhallinyarada ah arrimaha cusub ee ka jira internetka, waxa aad kala hadashaa mawduucyada ku saabsan, tusaale ahaan sida wararka been abuurka ah (harhaanjohtava tieto) loo faafiyo iyo hababka loo adeegsado saamaynta qofka lagu yeelanaayo, gaar ahaan kuwa sharciyaynaaya ama caadiga u muujinaaya xoogmuquuninta ama gacan ka hadalka.
- Kala hadal qofka dhallinyarada ah sida loo dhaqmo ama waxa la sameeyo marka la arko xog ama maclumaad xambaarsan xagjirnimo: ka codso ilmaha in waxa uu halkaas kala kulmay uu u sheego qof weyn oo uu ku kalsoon yahay, islamarkaana aanay sii faafin ama cid kale la wadaagin xogtaas, sidoo kale ka codso in ay aysan wax falcelin ah ka samayn arrinkaas, isla markaana ay u sheegaan maamulka ama adeeg bixiyaha bartaas internetka. Haddii loo baahdo, si wadajir ah ula xiriira hay'adaha ammaanka ee dowladda.
- Si wadajir ah isula eega adiga iyo qofka dhallinyarada ah sida loo isticmaalo nidaamka ammaanka ee internetka, iyo sida loo gudbiyo wixii wargelin ama cabashooyin ah ee loo baahdo in la gudbiyo. In badan oo baraha internetka ah waxaa ay leeyihiin ikhtiyaar ama doorasho lagu yareeyo ama lagu xakameeyo muuqaalka arrimaha waxyeellada leh.

## 4. Xooji muhiimadda sinnaanta iyo caddaaladda, iyo saamaynta wanaagsan ee dimuqraadiyadda

- Ku dhiirrigeli dhallinyarada in ay la falgalaan ama wax la qabtaan dad kala duwan, isla markaana ay ixtiraamaan aragtiyada kala duwan. Halkii laga abuuri lahaa iskahorimaad, waxa aad xoogga saartaa waxyaabaha la wadaago iyo waayo-aragnimada bini'aadantinimo ee guud.
- Kala hadal dhallinyarada xorriyadda hadalka, iyadoo xoogga la saaraayo arrinka ah mas'uuliyadda la xiriirta xoriyadda hadalka - xoriyadda hadalka xaq kuuma siinayso in lagu xadgudbo sharafta iyo qiimaha qofka bani'aadamka ah.
- Xoogga waxaad saartaa saamaynta wanaagsan ama faa'iidooyinka ay sinnaanta iyo caddaaladda, xuquuqda aadanaha iyo dimuqraadiyadda ay u leeyihiin bulshada, iyo sidoo kale dadka gaarka ah iyo guud ahaan dadka oo dhan.

***Hadalka nacaybka kicinaaya ma ahan mid waxyeello gaarsiinaaya qofka lala beegsanaayo oo keliya, balse wuxuu wiiqaa kalsoonida bulshada, wuxuu kordhiyaa kala qaybsanaanta, wuxuuna daciifiyaa tiirarka aasaasiga ah ee dimuqraadiyadda. Ka hadalka arrimaha ku saabsan nolosha dhijitaalka ah waa muhiim, si dhallinyaradu ay si ballaaran ugu aqoonsadaan saamaynta arrimaha waxyeellada leh, sidoo kalena ay u fahmaan in hadalka nacaybka kicinaaya iyo aragga uu qofku arko xoogmuquuninta ama gacan ka hadalka ee degaanka internetka, ay saameyn ku yeeshaan fikirka iyo dhaqanka dadka, xitaa arrimaha ka baxsan internetka.***

Haddii uu ku hayo welwel aad u wayn oo ku saabsan xaaladda nololwanaagga ee qofka dhallinyarada ah, ha ka labalabayn in aad caawimaad raadsato.

- La xiriir hay'adaha ka shaqeeya arrimaha la xiriira nololmaalmeedka dhallinyarada sida iskuulka, goobaha waxbarashada ama adeegyada dhallinyarada si aad u hesho taageero.
- Kooxda ka kooban dadka xirfadaha kala duwan ee loo yaqaan ankuri (Paikalliset moniammatilliset ankkuritiimit), waxay caawimaad ka gaystaan arrimaha welwelka leh ee la xiriira xagjirnimo noqoshada.
- Adeegga booliska ee warsiinta dhanka internetka (nettivinkki-palvelussa), waxa aad ku gudbin kartaa welwelka iyo walaaca kaa haysta arrimahaas, waxaadna ka heli kartaa caawimaadda booliska.

# KA AKHRI FAAHFAAHIN DHEERAAD AH BOGGAYAGA INTERNETKA.

pelastakaalapset.fi/turvanuotta

Pelastakaa Lapset
Save the Children

Euroopan unionin osarahoittama